



NØDVARSEL




1 **Waa ammaan** in Norway lagu noolaado.




2 **Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha** degdegga ah weli waa ka dhici karaan halkan.




3 Haddii ay jirto xaalad deg-deg ah, boliiska ama difaaca rayidka ayaa kuu soo diri kara degniinta xaaladda degdegga ah.



4 Talefankaaga ayaa gariirii doona, wuxuuna ka dhawaajini doonaa dhawaaq dheer.



5 **Akhri digniinta.** Waxay kuu sheegeysaa waxa dhacaya iyo waxa aad sameyn karto.



6 **Talooyinkana raac.** Tusaale ahaan waxaa laga yaabaa inay kuu sheegto inaad gudaha guriga aad joogtid, oo aad xirtid albaabada iyo daaqadaha.

Tijaabi Digniinta Xaaladda Degdegga ah

Digniinta Xaaladda degdegga ah waa waajib in la tijaabiyo waqti ka waqti. Tani caadi ahaan waa laba jeer sanadkii. Digniinta waxay si cad kuugu sheegi doontaa in ay tahay tijaabo. Wax talaabo ah looma baahna. Taariikhaha la qorsheeyay ee tijaabada www.emergencyalert.no

